

# ***Ka horrtagga hargab shimbireedka: naftaada iyo qoyskaagaba ku ilaali qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed (PPE).***



# ***Ka horrtagga hargab shinbireedka: naftaada iyo goyskaagaba ku ilaali qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed (PPE).***

## ***Si badbaado leh isaga bixi qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed ee PPE:***

1. Nadiifi oo jeermis dile mari kabaha buudka
2. Iska bixi kabaha buudka
3. Kor gashiyada iska bixi oo qashin-qubka ku tuur, iska ilaali taabashada wax jir ah ama dharka gudaha hoose inta aad sii socoto
4. Gacmo-gashiyada iska bixi oo qashin-qubka ku tuur
5. Ku dhaq gacmaha saabuun iyo biyo
6. Iska bixi ookiyaalaha, daboolka madaxa, iyo qalabka neef-qaadashada/afxirka
7. Nadiifi oo jeermis dile mari ookiyaalaha iyo qalabka neef-qaadashada haddii dib loo isticmaali karo
8. Isla markiiba mar kale ku dhaq gacmaha saabuun iyo biyo
9. Xusuusnow in qeybta kor jirta ee qalabkaaga is-ilaalinta shakhsiyeed (PPE) ay wasakheysan tahay, iska ilaali taabashada jirkaaga ama dharka hoose inta aad xiraneyso ama iska bixineyso qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed(PPE)

Haddii horintaada ama goobta shaqada laga helo hargab shinbireedka, ama haddii aad natiijooyin sugeyso, xirashada qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed (PPE) ayaa kaa caawin kara ilaalinta caafimaadkaaga iyo kan goyskaaga.

1. Xiro qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed (PPE) marka aad la kulmeyso digaag jirran ama dhimatay, saxaradooda, ama shay kasta oo dhex yaala xeradooda ama marka aad galeyso dhismo kasta oo ay joogaan digaag jirran ama dhimatay.
2. Ku dhaq gacmaha saabuun iyo biyo kadib marka aad iska bixiso qalabka is-ilaalinta shakhsiyeed (PPE).
3. Ha xiran ama ha dhigan dhar ama qalab wasakheysan gurigaaga dhexdiisa ama meel ka baxsan goobtaada shaqada.
4. La xiriiir waaxdaada caafimaadka dadweynaha ee maxalliga si aad u hesho hagitaan dheeraad ah. Waxaad wici kartaa 206-418-5500 si aad u weydiiso macluumaadka meelaha lagala xiriirayo waaxda caafimaadka ee deegaankaaga.

Si aad u codsatid inaad dukumiintigaan ku hesho qaab kale, wac 1-800-525-0127. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir [civil.rights@doh.wa.gov](mailto:civil.rights@doh.wa.gov).



DOH 420-487 May 2023 Somali